



(qofka Qur'aanka kor u akhriya wuxuu la mid yahay qofka sadaqada muujiya, qofka Quraanka siraystan wuxuu la mid yahay qofka sadaqada siraystay)

Cuqba Binu Caamir Aljuhani Allaha ka raali noqde waxaa laga wariyey nuu yiri: Rasuulka Ilaahay naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaate wuxuu yiri: (qofka Qur'aanka kor u akhriya wuxuu la mid yahay qofka sadaqada muujiya, qofka Quraanka siraystan wuxuu la mid yahay qofka sadaqada siraystay).

[Xadiis Saxiix ah] [waxaa wariyey Abuu daawuud,tirmidi, iyo nasaa.i]

Nabigu scw wuxuu sheegay qofka muujiya Qur'aanka akhrintiisa inuu la mid yahay qofka muujiya sadaqada bixinteeda, qofka akhrinta Qur'aanka qarsadana uu la mid yahay qofka sadaqada bixinteeda qarsada.

<https://sunnah.global/hadeeth/so/show/65055>

النجاة الخيرية
ALNAJAT CHARITY

